



DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA ITOOBIYA
DHOOL GAZETA

Somali Regional State of Ethiopia
የኢትዮጵያ ሶማሌ ክልላዊ መንግሥት

| | | |
|--------------------------------------|---|-------|
| Qimaha የንዱ ዋጋ Unit Price ብር | Dhool Gazeta Waxaa Soo Saara Golaha Xildhibaanada Dawladda Deegaanka Soomaalida Itoobiya | ✉ 392 |
|--------------------------------------|---|-------|

| | | |
|---|--|--|
| Bayaan Tirsi 179/2010 Bayaanka Aasaasida Xafiiska Sayniska Iyo Tiknoolojiyadda Bog 1 | | Proclamation No. 179/2018 Livestock and Pastoralists Development Bureau Establishment Proclamation.....Page 1 |
|---|--|--|

BAYAANKA TIRSI 179/2010

BAYAANKA AASAASIDA
XAFIISKA SAYNISKA IYO
TIKNOOLOJIYADDA
DAWLADDA DEEGAANKA
SOOMAALIDA ITOOBIYA

Maadaamo loo baahday in la kociyo Horumarka dhinaca Sayniska iyo Tiknoolojiyadda oo wax weyn ka tari doona Qorshaha koboca iyo isbedelka Dhaqaalaha.

Maadaama oo Deegaanku horumar baaxad leh ka sameeyay dhinacyada kuliyadaha iyo machadyada kala duwan ayna lagama maarmaan noqotay in lagu kabo aqoonta sayniska iyo Tiknoolojiyadda noocyadeeda kala duwan.

Maadaama oo loo baahday in la helo meel laga maamulo Cilmiga Sayniska iyo Tiknoolojiyadda kala duwan ayaa Golaha Xildhibaanada ee dawladda Deegaanka Soomaalida Itoobiya isagoo ka duulaya qodobka 49(3,B) ee dastuurka waxa uu soo saaray bayaankan:-

Qaybta Koowaad
Qodobo Guud

Qodobka 1:- **Cinwaan Gaaban**

Bayaankan waxaa loogu yeedhi karaa "Bayaanka Aasaasida Xafiiska Sayniska iyo Tiknoolojiyadda DDSI, Bayaan Tirsi 179/2010"

PROCLAMATION NO 179/2018

THE PROCLAMATION TO
PROVIDE FOR THE
ESTABLISHMENT OF SCIENCE
AND TECHNOLOGY BUREAU

Whereas, it is found necessary to promote the development Science and Technology sector, which shall have high paramount to the realization of growth and transformation plan.

Whereas, the State has made a remarkable achievements in the expansion of a range of colleges and institutes within the Region and thus found necessary to supplement this achievements with different professions of Science and Technology.

Whereas, it is found necessary to adhere together the different Science and Technology sector, the Council of the Regional State, in accordance with Article 49 (3, A) of the Constitution, hereby proclaimed as follows:

PART ONE
GENERALITY

1. Short Title

This Proclamation may be cited as the "Ethiopian Somali Regional State Science and Technology Bureau Establishment proclamation No.179/2018"

Qodobka.2^{aad} Qeexid

Hadaan haboonaanta eraygu macno kale siin, bayaankan dhexdiisa:-

1. **“Xafiis”** waxaa loola jeedaa Xafiiska Sayniska iyo Tiknoolojiyadda DDSI.
2. **“Deegaan”** waxaa loola jeedaa deegaanka soomaalida Itoobiya.
3. Bayaanka gudihiisa weedhaha loo xeeriyay labku, sidoo kale, waxay khuseeyan dhedhiga.

Qaybta labaad**Qodobka 3^{aad} Aasaasida**

1. Bayaankan Waxaa lagu aasaasay Xafiiska Sayniska iyo Tiknoolojiyadda DDSI” ahna Xafiis dawladdeed oo leh dhamaan xuquuqaha sharciiyeed ee xafiis leeyahay oo hada wixii ka dambeeya loogu yeedhi doono **“Xafiiska”**.
2. Xafiisku wuxuu hoostaga Madaxweynaha iyo Golaha hawl fulinta Deegaanka

Qodobka 4 Ujeedooyinka Xafiiska

Ujeedooyinka shaqo ee xafiisku waxay kala yihiin:-

1. Horumarinta iyo dhiirgalinta cilmiga Sayniska iyo Tiknoolojiyadda si ay ula jaanqaadaan halbeegyada Qaranka iyo guud himilooyinka horumarineed ee deegaanka u yaala.
2. Isku dheelitirka baahiyaha loo qabo cilmiga Sayniska iyo Tiknoolojiyadda iyo g/socodka horumarineed ee deegaanka si loo buuxiyo hadba agabka iyo aqoonta loo baahdo.

2. Definitions

In this proclamation, unless the context otherwise requires:

1. **“Bureau”** means bureau of Science and Technology of Ethiopian Somali regional state.
2. **“Region”** means Region of Ethiopian Somali.
3. Provisions of this proclamation set out in the masculine gender shall also apply to the feminine gender.

Part Two**3. Establishment**

1. The Ethiopian Somali Regional State Science and Technology Bureau (hereinafter referred to as the “Bureau”) is hereby established as an autonomous Government Body having its own legal personality.
2. The Bureau shall be accountable to the President and executive council of the Regional State.

4. Objectives of the Bureau

1. To encourage and enhance the Science and Technology activities that is compatible with the national standards and enables the realization of the Regional development objectives.
2. Isku dheelitirka baahiyaha loo qabo cilmiga Sayniska iyo Tiknoolojiyadda iyo g/socodka horumarineed ee deegaanka si loo buuxiyo hadba agabka iyo aqoonta loo baahdo

5. Qaab-dhismeedka Xafiiska

Xafiisku wuxuu yeelanayaa:-

1. Madax xafiiseed iyo ku xigeen ay soo magacaabaan Golaha hawl fulinta Deegaanku kadib marka uu Madaxweynahu soo hordhigo.
2. Geedi socodyada iyo shaqaalaha kale ee lagama maarmaanka u ah shaqada.
3. Xarunta Xafiisku waa magaalada Jig-jiga, haddana wuxuu gobolada iyo degmooyinka ku yelan karaan laamo hadba sida baahidu tahay.

6. Awoodaha iyo Waajibaadka Xafiiska

Xafiisku wuxuu leeyaa awoodaha iyo waajibaadyada soo socda:-

1. Wuxuu isagoo ka duulayaa siday u kala mudanaan yihiin diyaariya darasaadaha iyo barnaamijyada kala duwan ee la xidhiidha arrimaha sayniska iyo Tiknoolojiyadda; marka la ansixiyana hirgaliyaa;
2. Isaga oo la kaashanaya cidaha ay khusayso waxa uu qiimeeyaa baahida kala duwan ee Tiknoolojiyadda wuxuu raadiyaa, xulaa, soo geliyaa marka loo baahdona tirtiraa dhamaan Agabka Tiknoolojiyadda.
3. Wuxuu diiwaangaliyaa islamarkaana isku dubaridaa islamarkaana xaqiijiyaa tayada, isticmaalka iyo ka faa'ideysiga agabyada Tiknoolojiyadda ee laamaha kala duwan.
4. Wuxuu isku dubaridaa islamarkaana xaqiijiyaa in dhamaan shaqooyinka horumarinta cilmiga sayniska iyo Tiknoolojiyaddu ay la jaanqaadayaan baahida horumar ee Deegaanka.

5. The Organization of the Bureau

The Bureau shall have:

1. A Bureau head and Deputy Bureau head appointed by the Executive council of the Regional Government upon the recommendation of the president, and
2. The necessary departments and staff.
3. The head office of the Bureau shall be in Jig-jiga and it may establish branch offices elsewhere as may be necessary.

6. Powers and Duties of the Bureau

1. Prepare Regional science and technology research and development programs based on the country's development priorities, and upon approval implement the same.
2. In cooperation with the concerned bodies, establish a system for technology need assessment, identification, acquisition, utilization and disposal of it.
3. register technology transfers made in every sector, coordinate codification and technology capability accumulation efforts, and ensure successive use of same;
4. coordinate science and technology development activities and ensure that research activities are conducted in line with the region's development needs;

- | | | |
|---|--|---|
| <p>5. Waxa uu hirgeliyaa nidaamka keydinta xogta ee Hal-abuurka Cilmiga sayniska iyo Tiknoolojiyadda, waxaanu xaqiijiyaa in hawlaha sayniska iyo Tiknoolojiyaddu ay waafasanyihiin halbeegyada Qaranka ee dhinaca sayniska iyo Tiknoolojiyadda.</p> <p>6. Waxa uu isku xidhaa islamarkaana wada shaqeyn ka dhex abuuraa Xafiisyada dawladda, Xarumaha waxbarasho iyo warshadaha deegaanka ka jira si loo horumariyo loona tayeeyo cilmi-baadhisyaada iyo Tiknoolojiyadda.</p> <p>7. Wuxuu isaga oo la kaashanaya cidaha ay khusayso diyaariyaa islamarkaana dabagal ku sameeyaa horumarinta baahiyaha cuduuda shaqaale ee wakhtiga gaban, dhexe iyo fog ee dhinacyada dhinacyada sayniska iyo Tiknoolojiyadda, hal-abuurka iyo tayada kaabayaasha Dhaqaalaha. Waxaanu xaqiijiyaa in manhajka waxbarasho ee deegaanku ka jawaabeyo baahiyahan.</p> <p>8. Wuxuu bixiyaa tababaro lagu kobcinayo aqoonta iyo xirfada xirfadleyaasha ka hawlgala xafiisyada dawladda iyo xarumaha gaarka loo leeyahay ee ku hawlan Cilmiga sayniska iyo Tiknoolojiyadda.</p> <p>9. Wuxuu hirgeliyaa nidaam lagu abaal marinayo shaqsiyaadka ama xarumaha guulo la taaban karo ka soo hooyay horumarinta Cilmiga sayniska iyo Tiknoolojiyadda.</p> <p>10. Wuxuu aasaasaa, isku dubaridaa islamarkaana taageeraa Goleyaasha Horumarinta Cilmiga sayniska iyo Tiknoolojiyadda.</p> <p>11. Wuxuu hogaamiyaa xarumaha ka shaqeeya Cilmiga sayniska iyo Tiknoolojiyadda, waxaanu xaqiijiyaa inay kaalintii looga baahnaa ka geystaan horumarinta dhaqaale ee Deegaanka.</p> | | <p>5. organize science, technology and innovation data base, compile information, set national standards for information management, prepare and ensure the application of science and technology innovation indicators;</p> <p>6. Facilitate interaction and collaboration among Government, Higher Education and industries within the Region, with a view to enhancing research and technological development;</p> <p>7. prepare and follow up the implementation of the region's, short, medium and long term human resource development plans in the fields of science, technology, innovation and quality infrastructure; cooperate with the concerned organs to ensure that the region's educational curricula focus on the development of science and technology;</p> <p>8. Facilitate capacity building of public and private sector institutions and professionals involved in science and technological activities;</p> <p>9. Establish and implement a system for granting prizes and incentives to individuals and institutions who have contributed to the advancement of science, technology and innovations;</p> <p>10. Establish, coordinate and support councils that facilitate research activities on the development of science and technology;</p> <p>11. Lead science and technology related institutions and ensure their contribution to the economic development of the Region.</p> |
|---|--|---|

7. Awoodaha iyo waajibaadka Madax xafiiseedka

Madaxa xafiisku:-

1. Waxaa u dhaqangeliyaa awoodaha iyo waajibaadyada xafiiska ee ku xusan Qodobka 6^{aad} ee bayaanka
2. Wuxuu Maamulayaa, isku dubaridda islamarkaana uu Hogaamiyaa Xafiiska.
3. Wuxuu matalaa xafiiska marka uu la macaamilayo Qof saddexaad;
4. Wuxuu haggaa islamarkaana dabagal ku sameeyaa hawlaha xafiiska;
5. Wuxuu diyaariyaa islamarkaana u gudbiyaa laamaha ay khusayso qorshe sannadeedka, rubuceedka iyo miisaaniyadda xafiiska isagoo marka la oolaadana hirgelinaya.
6. Misaaniyadda xafiiska loo ansixiyay ayuu maamuli isagoo raacaya qorsheyaasha shaqo ee loo ansixiyay.
7. Wuxuu darsi Qaab-dhismeedka ku haboon xafiiska waxaanu u gudbin Golaha Hawl-fulinta, marka la ansixiyona wuu hirgelin.
8. Wuxuu diyaarin warbixinta xilliyeedka, waxqabadka xafiiska waxaana u gudbin xafiisyada ay khusayso.
9. Wuxuu hubin in shuruucda iyo awaamiirta la soo saaro ay ka dhaqangasho xafiiska;
10. Wuxuu xadka lagama maarmaanka u ah habsami u fulinta shaqada xafiiska guud ahaan ama qayb ka mid ah xilka iyo waajibaadka shaqo u xilsaari karaa Mas'uuliyiinta iyo shaqaalaha kale ee xafiiska.
11. Wuxuu shaqaalayn, maamuli islamarkaana eryaa shaqaalaha xafiiska isaga oo raacaya shuruucda maamulka shaqaalaha.

7. Powers and Duties of the Bureau Head

The bureau head shall:-

1. Cause the execution of the powers and duties of the bureau provided under Article 6 of this Proclamation.
2. Administer, organize and lead the Bureau.
3. represent the Bureau in all its dealings with third parties;
4. Direct and supervise the activities of the Bureau.
5. Prepare the annual, quarterly work programs and budget of the Bureau and submit to the concerned bodies, implement the same upon approval.
6. Effect expenditure in accordance with the approved budget and work programs of the Bureau,
7. Cause the Study of appropriate organizational setup of the Bureau and submit to the executive body of the regional government, implement the same upon approval.
8. Prepare the quarterly performance report of the Bureau and submit to the concerned bodies;
9. Ensure that laws and rules issued are properly enforced and applied in undertakings of the Bureau.
10. may delegate part of his powers and duties to the other officials and employees of the Bureau to the extent necessary for the efficiency of the Bureau ,
11. Employ, administer and dismiss employees of the Bureau in accordance with the civil service laws;

12. Wuxuu uu qabta hawlaha kale ee muhiimka u ah in la gaadho ujeedooyinka xafiiska
13. Wuxuu fuliyaa hawlaha kale ee ay u xilsaaraan xafiiska Madaxweynaha iyo Golaha Hawl Fulintu.

8. **Awoodaha iyo waajibaadka Ku Xigeenka Madaxa xafiiska**

ku Xigeenka Madaxa Xafiisku;

1. Wuxuu qaban hawlaha uu u xilsaaro Madaxa xafiisku;
2. Wuxuu u shaqayn madaxa Xafiiska marka madaxa Xafiisku uu maqan yahay ama una gudan Karin wajibaadkiisa.

Qaybta Afraad

Oodobo Kala Duwan

9. **Ilaha Miisaanivadeed ee Xafiiska**

Illaha Miisaanivadeed ee xafiisku waa:-

1. Miisaanivadeed dawladda deegaanku u qoondayso
2. Deeqaha kale ee uu ka helo Hay'adaha Dawladda iyo uruurada kale duwan.

10. **Diiwaanada xisaabeed**

1. Xafiisku wuxuu xafidayaa diiwaano xisaabeed oo sax ah islamarkaana dhamaystiran.
2. Diiwaanada xisaabeed iyo dhokumentiyada lacageed waxaa ugu yaraan sanadkiiba mar baadhitaan ku samaynaya Hanti dhawrka guud ee Deegaanka ama Hantidhawro uu wakiishay.

12. Engage in other activities necessary for the of its purposes;
13. Performs other duties assigned to him by the president and the executive Council of the Regional state.

8. **Powers and Duties of the Deputy Bureau Head**

The deputy Bureau Head shall:

1. Performs other duties assigned to him by the Bureau Head;
2. Act as Bureau Head in his absence or where unable to discharge his duties.

PART FOUR

MISCELLANEOUS

PROVISIONS

9. **Budget**

The budget of the Bureau shall be from:

1. Budget allocated by the State Government.
2. Donations received from other Governmental and non Governmental Organizations.

10. **Books of Accounts**

1. The Bureau shall keep complete and accurate books of accounts.
2. The books of accounts and financial documents the Bureau shall be audited annually by The Auditor-General of the Region or Auditors designated by him.

11. **Awooda soo Saarista**
X/nidaameed iyo Awaamiir

1. Golaha Hawl fulinta ee Deegaanku wuxuu soo saari karaa Xeer-nidaameedyada lagama maarmaanka u ah hirgelinta qodobada Bayaankan.
2. Xafiisku wuxuu soo saari karaa awaamiir lagu dhaqangelinayo Qodobada Bayaankan.

12:- **Shuruucda Aan Dhaqan galka**
la hayn

Sharci, xeer, awaamiir ama qaab dhaqmeed shaqo kasta oo ka hor imanaya qodobada bayaankan ma laha dhaqangal sharciyeed.

13. **Mudada Dhaqangalka Bayaanka**

Bayaankani wuxuu dhaqangalayaa laga bilaabo maalinta uu Ansixiyo Golaha Xildhibaanada deegaanku.

CABDI MAXAMUUD CUMAR
MADAXWEYNAHA DDSI

11:- **Power to Issue Regulations and**
Directives

1. The State Executive Council may issue regulations necessary for the implementation of this Proclamation.
2. The Bureau may issue directives necessary for the implementation of this Proclamation and the regulations issued pursuant to this Proclamation.

12. **Inapplicable Laws**

No law, regulation, directive or practice shall, in so far as it is inconsistent with this Proclamation, be applicable with respect to matters provided for by this Proclamation.

13. **Effective Date**

This Proclamation shall enter into force upon its approval by state council.

ABDI MOHAMUD UMER
PRESIDENT, ETHIOPIAN
SOMALI REGIONAL STATE